

Tilmaamaha wax ibsigaha inta lagu jiro karantillka cudurka Covid-19 : tani

waxaa bixiyay Barnaamijka ee Nafaqada ee Haweenka, Dhallaanka, iyo Caruurta WIC.

Waxaa laga yaabaa inay jiraan waxyaabo ka maqnaa waxaad ka heli karto dukaamada aad ka adeegato. Dukaamadu waxay soo wariyeen inay helayaan shixnado iyo buuxinta shelfiska dukaamada sida ugu dhaqsaha badan. Dadka wax iibiya ayaa waliba iibsanaya tiro aad uga badan sidii caadiga ahayd sidaa darteeda waqti dheer ayey qaadataa in cuntada iyo caanaha caruurta loo keeno shelfiska. Halkan waxaa ku yaal talo fiican oo kaa caawinaya inaad u dukaamaysato sahayada aad u baahan tahay.

- Dukaamaysiga bilowga bisha aad markay alaabtu soo galeyso. U tag dukaanka aroortii markii sahaydii hadda la diyaariyey.
- Haddii aadan ka heli karin agabkaaga cuntada ee caadiga ah, eeg Liiska Cuntooyinka COWIC ama Appka WIC Shopper si aad u eegto haddii ay jiraan xulashooyin kale oo beddelaad ah.

Tusaale ahaan: caano budada ah halkii caano fresh ah, bariis bunnii ah halkii rootida, ukunta dhexdhexaadka ah halkii ukunta waaweyn.

- Waxaad ubaahan kartaa inaad aado dukaan kale ama waxaad qorsheyneysaa safar aad ugu laabato dukaanka goor dambe. Waxaad kaliya u isticmaali kartaa qayb ka mid ah waxtarradaada kaarkaaga eWIC.
- Haddii caanobooraha carruurtu ay faaruq yihiin, weydii shaqaalaha dukaanka haddii ay yaqaanaan goorta la heli doono ama haddii gadaal dambe ay kayd dheeraad ah ku jiraan.
- Waxaa laga yaabaa inaad ka maqashay warbaahinta bulshada in kaararka eWIC waa la xirayaa macaamiisha WICna ay u baahan yihiin inay u isticmaalaan gargaarkooda taariikh cayiman. Tani maahan kiiska. Barnaamijka WIC ee Colorado wuxuu wali u adeegayaa macaamiisha iyo macaamiisha waxay ku sii wadan karaan iibsashada cuntada dukaamada raashinka iyagoo wata kaarkooda hadda (eWIC). Ma soo saarayno kaararka "gargaarka musiibada". Macluumaadka dheeri ah, fadlan raac bogga ColoradoWIC on Facebook.
- Ayadoo la raacayo qawaaniinta federaaliga ah, gargaarka cuntada ee aan la isticmaalin ma u wareegeyso bisha soo socota. Gargaarkaaga cuntada ayaa la heli karaa maalinta ugu horreysa bisha markay tahay 12:01 am oo waxay dhacayaan habeen barki maalinta ugu dambeysa dhamaadka bisha
- Dukaammada raashinka qaarkood ayaa xaddidaya iibsashada macaamiisha alaabada qaarkood, sida rootida, ukunta, iyo caanaha. Qoysaska WIC wali way heli karaan qadarkooda waxtarka. Tusaale ahaan, haddii aad leedahay saddex gallon oo caano ah

gargaaradaada WIC, waxaad u adeegsan kartaa dheefahaaga inaad iibsato seddex gallon oo caano ah hal jeer in kasta oo dukaanka uu lahaan karo xaddiga iibsiga ee hal galaan oo caano ah.

- adeeg qaadis / keenida iibka cuntada WIC lama heli karo. Waxaa suuragal ah inaad goor hore dukaanka aado markii ay dad badani kaa yaraadaan oo ay suuragal u tahay in alaabtu kaydsan yihiin.